Gaabiya Shaarubka Garkana daaya

Ibnu Cumar Allaha ka raali ahaado isaga iyo Aabihiye waxaa laga wariyey in Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee uu yiri: "Gaabiya Shaarubka Garkana daaya".
[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee wuxuu faray in la gaabiyo Shaarubka, oo aan la dayn balse lagu xeel dheeraado gaabinta. Taa baddalkeed wuxuu amray Rasuulku nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee in la daayo garka oo la dhaafo isagoo badan.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/3279